**4 toddobaad**
Booqashadaan waxaad la kulmi doontaan kalkaalisada caafimaadka iyo qof takhtar ah. Sida loo hubsado in wax kasta ubadkaaga ay u hagaagsan yihiin awgood, waxaanu ku dhaqaaqi doona baaritaanka caafimaadka ee guud, waxaa fiirogaar la siin doona horumarka, cabbirida culayska, cabbirida dhirirka iyo cabbirida wareegga maskaxda ee ubadkaaga. Waxaan kaloo doonayna in aan ogaanno sida idinka oo ah waalidiinta u caafimaadkiina yahay iyo sida xaaladiinna ay ahayd tan iyo markii aqalkiina aad ku noqoteen.

Ka fekera su'aallaha aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).

**2 bilood**
Booqashadaan waxaad la kulmi doontaan kalkaalisada caafimaadka ee rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta. Sida loo hubsado in wax kasta ubadkaaga ay u hagaagsan yihiin awgood, waxaanu ku dhaqaaqi doona baaritaanka caafimaadka ee guud, waxaa fiirogaar la siin doona horumarka, cabbirida culayska, cabbirida dhirirka iyo cabbirida wareegga maskaxda ee ubadkaaga. Xilliga booqashada waxaad heli doontaan fursad aad su’aallo ku waydiisaan kuna yeelataan wadahadal xiriir la leh waalidnimada iyo iyo baahida cunugga.

Ka fekera su’aallaha aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).

**3 bilood**
Booqashadaan waxaad la kulmi doontaan BVC-kalkaalisada caafimaadka. Sida loo hubsado in wax kasta ubadkaaga ay u hagaagsan yihiin awgood, waxaanu ku dhaqaaqi doona baaritaanka caafimaadka ee guud, waxaa fiirogaar la siin doona horumarka, cabbirida culayska, cabbirida dhirirka iyo cabbirida wareegga maskaxda ee ubadkaaga.

Markii u 3-bilood jir yahay, waxaa ubadkaaga laga tallaali doona cudurrada difteri = Cunnogale/difteeri (dhuun-xannun), stelkramp = kujiye/tetanus, kikhosta = xiiqdheer, polio = dabeesha (naafada carruurta), infeekshanada halista ah ee keena bakteeriga loo yaqaanno Haemophilus influenzae nooca b (Hib) iyo pneumococcal. Tallaalka loogu hortago cudurka hepatit B = cagaarshoow nooca B, waxaa fursadaas la siiya carruurta waalidiintooda ka yimaadeen dalalka u cudurkaas ku badan yahay. Waalidka dalalkaas aan ka iman oo laakinse doonaayo in ubadkiisa laga talaalo cudurka noocaan ah, wuxuu bixinayaa kharash tallaalkaas u gaar ah.
Tallaalka wuxuu ka kooban yahay laba cirbadood, lug kasta hal. Dhallanku inyar ayuu xannuun dareemi kara qaddar yar kaddib wuu ciribtirma dareenkaas. Halka laga tallaalay ayaa soo barari karto, gaduudan karto ama noqon karto meel dhanqasho leh.

Ka fekera su’aallaha aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).

**4 bilood**
Booqashadaan waxaad la kulmi doontaan BVC-kalkaalisada caafimaadka. Sida loo hubsado in wax kasta ubadkaaga ay u hagaagsan yihiin awgood, waxaanu ku dhaqaaqi doona baaritaanka caafimaadka ee guud, waxaa fiirogaar la siin doona horumarka, cabbirida culayska, cabbirida dhirirka iyo cabbirida wareegga maskaxda ee ubadkaaga.

Ka fekera su'aallo ku saabsan horumarka iyo caafimaadka ubadkaaga aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).

**5 bilood**
Markii ubadkaaga u 5 – 6 bilood buuxsado, waxaa la gaaray xilligiii u booqan lahaa rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta. Booqashadaan waxaad la kulmi doontaan kalkaalisada caafimaadka iyo qof takhtar ah. Sida loo hubsado in wax kasta ubadkaaga ay u hagaagsan yihiin awgood, waxaanu ku dhaqaaqi doona baaritaanka caafimaadka ee guud, waxaa fiirogaar la siin doona horumarka, cabbirida culayska, cabbirida dhirirka iyo cabbirida wareegga maskaxda ee ubadkaaga.

Xitaa booqashadaan waxaa ubadkaaga laga tallaali doona cudurrada difteri = Cunnogale/difteeri (dhuun-xannun), stelkramp = kujiye/tetanus, kikhosta = xiiqdheer, polio = dabeesha (naafada carruurta), infeekshanada halista ah ee keena bakteeriga loo yaqaanno Haemophilus influenzae nooca b (Hib) iyo pneumococcal iyo laga yaaba allaalka loogu hortago cudurka hepatit B = cagaarshoow nooca B.
Waa isla tallaaladii oo berri hore laga tallaalay. Tallaalka wuxuu ka kooban yahay laba cirbadood, lug kasta hal. Dhallnku inyar ayuu xannuun dareemi kara qaddar yar kaddib wuu ciribtirma dareenkaas. Halka laga tallaalay ayaa soo barari karto, gaduudan karto ama noqon karto meel dhanqasho leh.

Ka fekera su'aallo ku saabsan horumarka iyo caafimaadka ubadkaaga aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).

**10 bilood**
Booqashadaan waxaad la kulmi doontaan BVC-kalkaalisada caafimaadka. Sida loo hubsado in wax kasta ubadkaaga ay u hagaagsan yihiin awgood, waxaanu ku dhaqaaqi doona baaritaanka caafimaadka ee guud, waxaa fiirogaar la siin doona horumarka, cabbirida culayska, cabbirida dhirirka iyo cabbirida wareegga maskaxda ee ubadkaaga.

Ka fekera su'aallo ku saabsan horumarka iyo caafimaadka ubadkaaga aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).

**12 bilood**
Goor dhow ubadkaaga wuxuu buuxsan doona 1 sano, waxaana la gaari doona goortii u rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta booqan lahaa. Goortaan wuxuu la kulmi doona kalkaalisada caafimaadka iyo qof takhtar ah. Waxaa la cabbiri doona culayskiisa, kaddib lagu dhaqaaqi doona baaritaanka caafimaadka ee guud sida loo hubsado in wax kasta ubadkaaga ay u hagaagsan yihiin awgood.

Xitaa booqashadaan waxaa ubadkaaga laga tallaali doona cudurrada difteri = Cunnogale/difteeri (dhuun-xannun), stelkramp = kujiye/tetanus, kikhosta = xiiqdheer, polio = dabeesha (naafada carruurta), infeekshanada halista ah ee keena bakteeriga loo yaqaanno Haemophilus influenzae nooca b (Hib) iyo pneumococcal iyo laga yaaba allaalka loogu hortago cudurka hepatit B = cagaarshoow nooca B.
Waa isla tallaaladii oo berri hore laga tallaalay. Tallaalka wuxuu ka kooban yahay laba cirbadood, lug kasta hal. Dhallnku inyar ayuu xannuun dareemi kara qaddar yar kaddib wuu ciribtirma dareenkaas. Halka laga tallaalay ayaa soo barari karto, gaduudan karto ama noqon karto meel dhanqasho leh.

Ka fekera su'aallo ku saabsan horumarka iyo caafimaadka ubadkaaga aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

Sida dadka waawayn oo kale, xitaa carruurta yaryar waxay hordhac ahaan jecel yihiin in ay ogaadaan waxa dhici doono. Sidaas awgeed, booqashada kahor ubadkaaga u diyaari booqashada kana sheekeyso dhacdoonada.

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).

**18 bilood**
Goor dhow ubadkaaga wuxuu buuxsan doona 18 bilood, waxaana la gaari doona goortii u rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta booqan lahaa. Goortaan wuxuu la kulmi doona kalkaalisada caafimaadka. Waxaa lagu dhaqaaqi doona baaritaanka caafimaadka ee guud sida loo hubsado in wax kasta ubadkaaga ay u hagaagsan yihiin awgood. Kaddib waxaa la cabbiri doona culayskiisa, cabbirida dhririrka iyo cabbirida wareegga maskaxda ee ubadkaaga.

Waxaa laga tallaali doona cudurrada mässling = jadeeco, påssjuka = qaamo-qashiir iyo röda hund = jadeecada jarmalka. Waa tallaal isku-darsan oo looga hortago saddexda cudur, waxaana laga tallaala cududa. Dhallanku inyar ayuu xannuun dareemi kara qaddar yar kaddib wuu ciribtirma dareenkaas. Waalidka waa in u ku dadaala dejinta ubadkiisa isagoo habsiiyo, taasoo ah arrin muhim ah.

Markii 1–2 toddobaad tallaalida ka soo wareegato, waxaa laga yaaba in ubadkaaga u la kulmo waxyeelada tallaalka, taasoo ku soo ifbaxo qandho ama finan. Cunugga qofna cudur ma qaadsiin karo waxyaalahaas dhowr maalmood kaddib ayay ciribtirmaan.

Sida dadka waawayn oo kale, xitaa carruurta yaryar waxay hordhac ahaan jecel yihiin in ay ogaadaan waxa dhici doono. Sidaas awgeed, booqashada kahor ubadkaaga u diyaari booqashada kana sheekeyso dhacdoonada.
Ka fekera su'aallaha aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

**Haddii aadan iman karin ama aad doonayso inaad ballanka wax ka bedesho waa muhim inaad na wargeliso!**

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).

**3 sano**
Waxaa imminka la gaaray ”Booqashadii 3-da sano” ee rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta. Goortaan wuxuu la kulmi doona kalkaalisada caafimaadka iyo qof takhtar ah. Booqashadaan waxay qaadan karta ugu yaraan 30 daqiiqo. Sidii berri hore waxaanu ku dhaqaaqi doona qiimaynta caafimaadka, korniinka iyo horumarka. Waxaan idin waydiin doona su’aallo dheeraad oo ku saabsan horumarka luqadda ee ubadkaaga.
Waxaa warqadaan ku lifaaqan foom su’aallo ku qoran yihiin, kuwaasoo la idinka codsanaayo inaad ka soo jawaabtaan. Foomka oo buuxsan waa inaad la kaalisaan markii aad na booqanaysaan. Xilliga booqashadaas waxyaalaha ubadkaaga la tusin doono, waxaa kamid ah sawirro midabyo kala duwan leh kaddib su’aallo ayuu ka jawaabi doona. Xitaa waxaa laga codsan doona in u wax gacanta ku masawirro, iyo in kolba u hal lug ku boodo iyo kubbad u laado.
Shabakadda internetka 1177.se waxaad adiga iyo ubadkaaga ka daawan kartaan masawirro nuuxnuuxsanaayo: www.1177.se/Jamtland-Harjedalen/3arskontroll

Qofka waalidka ah ayaa aqoonta ugu sareeyso ee ubadkiisa leh. Shaqaalaha dugsiyada xannaanadda iwm waxay khibrad u leeyihiin kooxaha carruurta, waxayna fiirogaar siinayaan isi-saamaynta ubadkaaga, carruurta kale iyo dadka waawayn. Haddaba sida lagu helo muqaalka dhinac kasta ee ubadkaaga, waxaa wanaagsan inaad wadahadal la yeelato shaqaalaha dugsiyada xannaanadda booqashada kahor, kaasoo ku saabsan horumarka ubadkaaga.

Sida dadka waawayn oo kale, xitaa carruurta yaryar waxay hordhac ahaan jecel yihiin in ay ogaadaan waxa dhici doono. Sidaas awgeed, booqashada kahor ubadkaaga u diyaari booqashada kana sheekeyso dhacdoonada.
Ka fekera su’aallo aad adiga iyo ubadkaaga waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).

REGION JÄMTLAND HÄRJEDALEN

**4 sano**
Da'da ubadkaaga imminka waa 4 sano. Waxyaalaha booqashada 4 sannadood lagu dhqaaqi doono, waxaa kamid ah qiimaynta heerka korniinka iyo horumarka ee ubadkaaga. Ubadkaaga waxaa la waydiin doona in u wax gacanta ku masawirro, u kuul dun geliyo iyo ku socdo socod dheelitiran. Waxaa kaloo la baari doona awoodda aragtidiisa. Waxaa ubadkaaga loo gelin doona okiyaalo kaddib hal il ayaa xaansho laga saari doona.
Waxaa warqadaan ku lifaaqan foom su'aallo ku qoran yihiin, kuwaasoo la idinka codsanaayo inaad ka soo jawaabtaan. Foomka oo buuxsan waa inaad la kaalisaan markii aad na booqanaysaan.

Sida dadka waawayn oo kale, xitaa carruurta yaryar waxay hordhac ahaan jecel yihiin in ay ogaadaan waxa dhici doono. Sidaas awgeed, booqashada kahor ubadkaaga u diyaari booqashada kana sheekeyso dhacdoonada.
Ka fekera su'aallaha aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).

---

**5 sano**
Tani waa booqashada rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta qorsheysan ee ugu dambayso, taasoo ka horeyso tan rugta daryeel-caafimaadeedka dugsiga. Booqashadaan waxaad la kulmi doontaan kalkaalisada caafimaadka ee rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta.
Booqashadaan waxay qaadan karta ugu yaraan 30 daqiiqo.
Sidii berri hore waxaanu ku dhaqaaqi doona qiimaynta caafimaadka, korniinka iyo horumarka.
Ubadkaaga waxaa laga codsan doona in u wax gacanta ku masawirro iyo in hal lug ku bood-boodo.

Qofka waalidka ah ayaa aqoonta ugu sareeyso ee ubadkiisa leh. Shaqaalaha dugsiyada xannaanadda iwm waxay khibrad u leeyihiin kooxaha carruurta, waxayna fiirogaar siinayaan isi-saamayntaada iyo carruurta kale iyo dadka waawayn. Haddaba sida lagu helo muqaalka dhinac kasta ee ubadkaaga, waxaa wanaagsan inaad wadahadal la yeelato shaqaalaha dugsiyada xannaanadda booqashada kahor, kaasoo ku saabsan horumarka ubadkaaga.
Waxaa warqadaan ku lifaaqan foom su’aallo ku qoran yihiin, kuwaasoo la idinka codsanaayo inaad ka soo jawaabtaan. Foomka oo buuxsan waa inaad la kaalisaan markii aad na booqanaysaan.
Ubadkaaga dugsi ayuu goor dhow bilaabi doona. Sidaas awgeed, baaritaanka caafimaadka wuxuu waxtar wayn u noqon doona dugsi bilaabida wanaagsan.

Markii goortaan u ubadkaaga na booqan doono waxaa laga tallaali doona cudurrada difteri = Cunnogale/difteeri (dhuun-xannun), stelkramp = kujiye/tetanus, kikhosta = xiiqdheer, polio = dabeesha (naafada carruurta) waxaan caadi ahaan laga tallaali doona murqaha cududa

Sida dadka waawayn oo kale, xitaa carruurta yaryar waxay hordhac ahaan jecel yihiin in ay ogaadaan waxa dhici doono. Sidaas awgeed, booqashada kahor ubadkaaga u diyaari booqashada kana sheekeyso dhacdoonada.
Ka fekera su’aallaha aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.

Ka fekera su’aallaha aad waydiin lahaydeen markii rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta [BVC] aad booqanaysaan.
Haddii aad doonaysaan in xilliga booqashada aad qof takhtar ah la kulantaan, waa in kahor aad rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta arrintaas kala xiriirtaan.

***Ha iloowina inaad la kaalisaan buugga caafimaadka [hälsobok] ee ubadkiinna.!***

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka iyo horumarka ubadkaaga waxaad ka aqrisan karta www.1177.se (Bogga mowduca carruurta iyo waalidiinta).